# CFPM

## Mamuleyaasha Shahaadada u haysta Ilaalinta Cuntada ee CFPM

Inta badan shirkadaha cuntada waxaa laga rabaa inay haystaan shahaadada **Maamulaha Shahaadada u haysta Ilaalinta Cuntada (CFPM)** Washington Administrative Code (WAC, Xeerka Maamulka Washington 246-215-02107). Qof kasta oo aad ku aaminto inuu kaa caawiyo badqabka cuntada ee ganacsigaag ayaa noqonaya CFPM. Waxay u baahan yihiin inay ogaadaan noocyadaada cuntada, goobta, shaqaalaha, xeerka cuntada, ayna awoodaan inay ku baasaan imtixaanka CFPM.

Akhri agabyada Active Managerial Control (Xakmaaynta Maamulka ee Firfircoon) www.doh.wa.gov/foodrules. CFPM khasab maahan inuu goobta joogo laakiin nuqul kamid ah shahaadada CFPM ayaa la rabaa inay goobta taalo.

La shaqee waaxdaada caafimaadka ee deegaankaaga haddii aad su'aalo qabto. www.doh.wa.gov/localhealthfoodcontacts

## CFPM ayaa lagaa rabaa haddii shirkaddaada cuntadu diyaariso cunto, sida:

Ma aragtid miyaa nooca ganacsigaaga? Weydiiso waaxdaada caafimaadka deegaankaaga haddii aad CFPM u baahan tahay.



haddii aad isticmaasho waxyaabaha cayriinka ah ee xoolaha



haddii aad dhaqdo waxsoosaarka cayriinka ah



haddii aad qaboojiso cuntada la kariyay



haddii ada isticmaasho nidaam gaar ah



haddii aad u adeegto bulsho nugul

## Kaalinta CFPM

**Tababridda dadka shaqada haya**



**Xaqiijinta in nidaam la sameeyo lana raaco**



**U diyaargarowga iyo ka jawaabista arrimaha ku saabsan badqabka cuntada**



## Sida shahaado loo helo

**Dooro adeeg bixiye imtixaan oo la aqoonsan yahay** — **Is diyaari oo baro** — **Tijaabi oo gal imtixaanka**



Wxaaad imtixaanka ku qaadan kartaa si fool ka fool ah ama hab onleen ah. Ka hel onleenka noocyada imtixaanka.

- Tag ANAB - ANSI National Accreditation Board.
- Dooro imtixaankaaga.

Baro ka hor inta aadan imtixaanka galin. Dib u eeg xeerka cuntada, oo ay kujiraan:

- Khataraha badqabka cuntada
- Caafimaadka shaqaalaha
- Heerkulka cuntada
- Nadiifinta iyo Jeermis dilista

- Qaar ka mid ah adeeg bixiyeyaasha ayaa bixiya agabka wax lagu baranayo ama tijaabada imtixaanka.
- Imtixaanku wuxuu yeelan doonaa qiyaastii 80tan su'aalood.

ANAB ANSI National Accreditation Board — ACCREDITED PROGRAM ANSI National Accreditation Board and the Conference for Food Protection

Xaqiiji in shahaadadu leedahay calaamaddaan

Washington State Department of HEALTH

**DOH 333-335 CS November 2023 Somali**

Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1-800-525-0127. Haddii aad tahay macaamiil dhagool ah ama aad maqal culus tahay, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimayl udir doh.information@doh.wa.gov.